JAMHURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta

XAFIISKA MANAAHIJTA

# BARBAARINTA IYO CILMIGA BEESHA

## FASALKA LABAAD



**JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA**

Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta

XAFIISKA MANAAHIJTA

# BARBAARINTA

# IYO CILMIGA BEESHA

## FASALKA LABAAD

Buuggan lama daabacan karo lamana guurin karo iyadoo aan Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta laga helin oggolaansho.

Waxa lagu daabacay Madbacadda Qaranka.
Xamar — 1975



Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre,
Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka ee
Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya

# T U S M O


| | Bogga |
|---|---|
| Dalkeennu waa Soomaaliya | 1 |
| Ubaxa Kacaanka Oktoobar (UKO) | 9 |
| Jaalle Siyaad | 13 |
| Dhagaxtuur waa tilmaan Geesinimo | 18 |
| Iskaa wax u Qabso: Isla jir, isla shaqayn, isjecal | 21 |
| Hooyo hantiwadaag ah | 24 |
| Aabaha hantiwadaagga ah | 32 |
| Xirfadaha kala geddisan | 35 |
| Dalkeyga aan daafaco (will geesi ah) | 38 |
| Cadowga Soomaaliya | 47 |
| Xilka iyo xiriirka Qoyska | 52 |
| Gabadha Soomaaliyeed | 56 |
| Ilaaliyaha dalka | 62 |
| Cayaar Soomaali | 67 |

## M A H A D N A Q

Waxaan u mahadnaqaynaa :
Mascuud Sheekh Ibraahim
Maxamed Cali Warsame
Xersi Axmed Guuleed oo buuggan qoray,

Waxaa kaloo mahadnaq leh dhammaan dadkii kale ee suurageliyay soo saaridda kitaabkan oo uu ka mid yahay Cumar Saalim Axmed oo sawirrada u sameeyey iyo garaacayaashii garaacay.

Maamulaha Xafiiska Manaahijta

Bashiir Faarax Kaahiye

# GOGOLDHIG

Maaddada Barbaarinta iyo Cilmiga Beesha waa maaddo ku cusub Manhajka waxbarashada dalkeenna Soomaaliya. Maaddadu waxay ka mid ahayd arrimihii badnaa ee muhiimka wada ahaa ee ka maqnaa waxbarashada iyo barbaarinta, gaar ahaan, iyo guud ahaan dalka oo dhan, Kacaanka ka hor, waxayna la dhalatay Kacaankii 21kii Oktoobar 1969. Sababta ay ula dhalatay kacaanka waxay ahayd: Kacaanka baahi baa dhalisay, keentay, wuxuuna u dhashay in uu xaqiijiyo ujeeddooyinka ummadda, iyo in uu fuliyo barnaamijka loogu tala ga lay in lagu hirgeliyo ujeeddooyinkaas.

Hirgelinta ujeedooyinka iyo barnaamijka waxay u baahan yihiin runtii dad baahidooda gartay, aamminsan oo u diyaar ah niyo, garasho iyo falid ahaanba, inay u hawl galaan oo ay u dhintaan. Taasi waxay u baahan tahay (Barbaarin ujeeddo leh). Maaddadani waxaa weeye jid cusub oo aynu ku doonayno inaan ilmaha ku siinno Abuur Soomaaliyeed, nuguur (dabeecad), akhlaaq toosan, fikrad horusocod ah, damiir fayow iyo ildheeri siyaasi ah, si ay ku yeeshaan berri qofnimo suub, ban, waddaninimo, xilkasnimo, dulqaad, iyo dhammaan qiyamka la rabo ee fiican. Maaddadaanina waxay inoo horseedaysaa inaan abuurro mujtamac dadkiisu qiyamkaas leeyihiin.

Runtii, innagu intaas oo dhan waa wada siin karnaa ilmaha, in kasta oo ay jiraan waxyaabo ka mid ah nuguurtiisa (dabeecaddiisa) asalka ah. Hase yeeshee, innaga shaqadeennu waxa weeye inaan barbaarinno, korinno, kordhinno oo qaabinno nuguurta uu ilmuhu ku dhashay (in-born qualities). Sida cuntadu, biyahu, qorraxdu iyo hawadu u barbaariyaan (u koriyaan) noolaha (dadka, xayawaanka, geedaha iwm.) ayay waxbaridda iyo barbaarinta saxa ahi u siiyaan qofka korriimo,

caqli, caadifo iyo jir. Macnuhu waxaa weeye, qofnimada waxaa isla sameeya : nafaqada, aqoonta (Barbaarinta) iyo dhaqanka, ama nolosha ku wareegsan ee uu ku dhex nool yahay. Qofnimo waxaan ula jeednaa nuguurta (anshaxa iyo kartida) qofka lagaga sooco dadka kale. Qofnimadu waa sidaa qofku u dhaqmo iyo siduu u fakaro : waxa la xun iyo waxa la fiican, waxa uu macaansado iyo waxa la kharaar.

Waxaa la yiraahdaa, nuguurta ilmuhu marka ay dhashaan waa «dhexdhexaad» (neutral). Laakiin marka dambe waxay u dheeliyaan dhinaca loo barbaariyo inta ay yar yar yihiin. Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa (Caruuri Gaalo iyo Muslim midna ma aha ee waa kii lagu daraa). Haddaba, waxaa la oran karaa ilmuhu marka ay yar yar yihiin oo ay da'daas ku jiraan (ilaa 9 sano) ayay qofnimadoodu «Tallaalantaa». Sidaas awgeed, waxaa inala gudboon, haddii aan nahay barayaalka iyo barbaariyeyaalka, inaan xooggeenna isugu geynno barbaarinta dhallaanka oo aan ku tallaallo nuguurta iyo tilmaamaha aan la doonayno ilmaha. Taasi waa xilka ay ummaddeennu inagu aammintay, maaddadanina waa jidka inagu kaalmaynaya sidii aan xilkaas uga soo bixi lahayn.

Waxbaridda iyo barbaarintu waxay had iyo goor yihiin, kuwo qofnimada xumaanta ka gooya, uguna beddela wanaag. Waxay siiyaan dadka qalab mid muuqda iyo mid aan muuqan oo gayeysiiya inay ku hagaajiyaan noloshooda, kana daaweeyaan dhibaatooyinka hadba mar la soo gudboonaada, si ay ula socdaan isbeddelka taariikhda. Marka, barbaarintu waa mid aannu ku doonayno qofnimo wanaagsan oo karti leh.

Waxaa isweydiin leh, qofnimadu ma wax taagan baa? Mase maya? Professor Mauris, oo Ameerikaan ah, waxa uu inoo sheegay «waxa qofka noqonayaa waa in uu noqdaa (Isbeddel soconaaya) oo joogta ah» oo la socdaa isbeddelka taariikhda. Haddaba, waxaa la oran karaa qofnimadu waa isbeddel soconaaya. Isbeddelkaasi sidee u yimaadaa? Waagii kasta, meeshii kasta, iyo wixii kastaba wax baa kaaga siyaada. Qofkii aad la kulantidba waa kuu adduun cusub, sidoo kale shaygii (Miis, matalan) aad aragtidba waxa uu ku siiyaa aqoon hor leh. Haddaba, weligaa isbeddel baad ku jirtaa. Qofka gaar ahaantiisa iyo aqoonta uu ka helayo dibaddiisa ayaa soo saara

qofnimada gaarka ah ee qofka ku jirta, haddii qof kasta qof kale iyo shay kale uu wax ka baranayo si uu qofnimo gaar ah u yeesho, waxaa waajib ah in qof kastaa iyo shay kastaba hagaagsan yahay, illeyn iyagaa qofnimada abuuree.

Danta laga leeyahay Barbaarinta iyo Cilmiga Beesha wa xaa weeye in lagu hagaajiyo qofka, qofkuna markiisa, qof kale iyo shay kale ku hagaajiyo si degaanka oo dhan, dad iyo duunyo uu u hagaago.

Qofnimo wanaagsani ma soo baxdo ayadoo aan dibadda laga qorin (laga barbaarin). Qofka waxaa dadnimadiisa dhisa macaamilka iyo is afgaradka uu dadka kale la leeyahay. Tajaawubka iyo macaamilka hagaagsan waxaa abuuri kara (Macallin wanaagsan). Maxaa jira, waa macallinka qofka u gudbiya dhallaanka mujtamaca runta iyo qiyamka toosan ee keena macaamilka iyo tajaawubka iyo isu habrshada beesha isla noolaanta iyo isjecaylka, qofkuna sidiisa wuxuu u jiraa ama u joogaa qof kale daraaddii. Albert Bawbar ayaa arrintaas si cad u sheegay markuu yiri : (1 — Thou?, «Aniga-Adiga. Anigu waa adiga, adiguna waa aniga. Anigu waxaan u joogaa adiga daraaddaa, adiguna waxaad u joogtaa aniga daraadday. Adigu ma jirteen aniga la'aantay, aniguna sidoo kale ma jireen adiga la'aantaa. Xikmaddaasi qiimo weyn bay inoo leedahay, innaga barbaariyeyaalka ah, maxaa jira waxay inoo sheegaysaa in qiimaha qofku yahay qofka kale wuxuu ka helay.

Laba wax oo waaweyn ayaa qofka, gaar ahaan macallinka, ama dugsiga laga helaa : run cilmi ah iyo qiyam (Moralities). Cilmigu qofka ma abuuro, laakiin, qofka ayaa abuura cilmiga. Qof kastaa ma abuuro cilmiga ee waxaa abuuri kara qofka leh qiyamka wanaagsan, tarbiyadduna waa jidka lagu abuuro qof qiyamkiisu hagaagsan yahay si uu cilmi u sameeyo. Cilmiga sidiisa waa la wadaa (Value guided). Haddaba Maaddada Tarbiyadda iyo Cilmiga Beesha waa hooyada culuumta kale. Waxaa la oran karaa culuumta kale waxay u shaqaysaa Maaddadan, maxaa jira waxay dhisaysaa qofnimo, culuumtuna waxay u shaqaynaysaa qofka, qofkaana keena. Taasi waxay run noqon kartaa marka macallinku garto fartiintiisa (resaaladiisa) ah tarbiyadda.

Run ahaan, qiyamku ma aha wax guud oo dunidoo dhan ka dhexeeya (Universal). Laakiin, mujtamacaadka dunidu waa kala duwan yihiin. Waxyaalaha ay ku kala duwan yihiin waxaa ugu weyn : dhaqanka iyo nidaamka (system) dhaqaalaha. Mujtamac kastaa wuxuu leeyahay dhaqan iyo nidaam dhaqaale oo u gooni ah iyo nidaam uu rabo inuu dhaqaalihiisa ku dhiso, mujtamac kastaana dadkiisa wuxuu ku barbaariyaa si waafaqsan dhaqankiisa, siyaasaddiisa, dhaqaalihiisa, iyo siduu ka rabo aayatiinkiisa dambe. Sidaa daraaddeed, innagu waxaan leenahay dhaqan gaar ah (Islaami ah) iyo nidaam aan doonayno inaan dhaqaaleheenna ku dhisno (Hantiwadaag) iyo ujeeddooyin fog. Barbaarinta iyo Cilmiga Beesha waa inay noqotaa mid waafaqsan oo u shaqaysa dhaqankeenna, siyaasaddeenna, dhaqaalaheenna iyo ujeeddadeenna fog.

Maaddadan marka la dhigayo, oo ilmaha la barayo, waa inayna ku koobnaan casharrada buugga ku qoran oo keliya, Mar kasta waxaa soo kordha arrimo cusub, waxaa dhaca isbeddel. Waxaa la yiraahdaa waagii beryaba geddiisa (xaalkiisa) leh. Haddaba, waa in ardavda lala socodsiivaa hadba waxa soo kordha iyo isbeddelka dhaca. Waxaa kale oo aad wax kuu taraya, haddii aad tahay macallinka, suugaanta iyo hiddaha shacabkeenna Soomaaliyeed. Taas dambe aad bay muhim u tahay, maxaa jira, waxaa aad dhallaanka aamminsiinaysid waxaa ugu weyn dhaqanka iyo danta ummaddooda.

Marka, wax kasta oo la barayo waa in lagu baraa ama loogu soo gabbadaa dhaqankooda iyo suugaantooda, kuwaa oo ah ruuxa ummadda. Ilmuhu waa inay noqdaan ruux ummaddooda ee dhaqdhaqaaqa, iyo caqligeeda fakara iyo aydiyoloojiyadeeda wax dhista.

Kitaabkani waa kan 2aad ee Barbaarinta iyo Cilmiga Beesha. Waxaa loogu tala galay Fasalka 1aad ee Dugsiyada Hoose ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya. Ilmuhu marka ay ku jiraan fasalkan waxay soo baranayaan akhriska iyo qorista. Ereyada wax lagu barayo waa inay noqdaan kuwo fudfudud, sahlan oo gaagaaban. Qorayaalku markii ay buugga qorayeen, maskaxda ayay ku hayeen arrintaas. Hase yeeshee waxaa ku jira ereyo qorayaalku iska isticmaaleen oo adadag, maxaa jira buugga waxaa lagu qoray degdeg, afkeennana wax ku ba-

rashadiisu waa nagu cusub tahay, oo weli lama yaqaan inta ereyo ee ardayga Fasalka 2aad ku jiraa yaqaan. Tan labaad, buuggani ma leh Cashar-Bixin sida buugga 1aad, haddaba, macallinku marka uu bixinayo cashar kasta waa inuu diyaarsadaa cashar-bixin.

Casharrada aan u doorannay buuggan waa kuwo aan ka fogeyn deggaanka dabeeciga iyo ijtimaaciga ah ee ardayga. Waxaa loogu tala galay casharradaas inay ilmaha ku abuuraan geesinnimo iyo waddan jecayl, isku kalsooni iyo isla weyni, akhlaaq iyo anshax, kacaannimo iyo hawla jecayl, adkaysiin iyo dulqaad, si uu u noqdo mawaadin suubban oo karti leh, oo ka fakara waddanikiisa, ka hor inta uusan la fakarin naftiisa.

Cashar kasta marka la bixinayo, waxaa waajib ah in lagu dhaqmo ama la raaco jidka soo socda :-

1. Marka cashar bilaabma ilaa marka uu dhammaado, waa in ardaydu si firfircoon (actively) uga qayb galaan casharka, Macallinkana waxaa waajib ku ah inuu ardaydiisa ka qayb geliyaa casharka uu bixina yo. Waxa aad doonaysid inaad ardayda u sheegtid, ama bartid, marka hore, weydii ardayda, kana doon jawaabta inay helaan, dabadeedna si tifaftiran ugu sharax.

2. Isku day, inta aad kari-kartid, in casharku noqdo mid xiisa leh oo la jeclaado. Haddii ardaydu cuqdo ka qaaddo, waa ka xiisa dhacayaan casharka iyo xataa adiga baraha ahba. Weligaa kici xiisaha ardayda, shuqli ardayda oo maskaxdooda ka shaqaysii.

3. Waxaad ardayda xiisahooda u kicin kartaa, casharkaagana uga dhigi kartaa mid la fahmo oo la yaqaan, marka aad isticmaashid qalabka dadka wax lagu baro (Visual Aids). Ururso, marka hore, qalab ku kaalmeeya, marka aad cashar kasta bixinaysid qalabka kaalmadu waa muhiim.

4. Cashar kasta fikrad, ama fikrado asaasi ah ayaa ku jira iyo ujeeddada laga leeyahay fikradahaas, bar ar-

dayda fikradda iyo ujeeddada laga leeyahay. Hubso oo sug inay fahmeen oo qaateen.

5. Casharradu waa inay isku xirxiriirsan yihiin oo isku dhisan yihiin. Isugu xiji casharrada sida ay isu lee-yihiin oo ay isugu dhow yihiin, isuna raaci karaan.

6. Cashar kasta marka uu dhammaado, waa in ardayda la siiyaa layliyaal ay kaga shaqeeyaan dugsiga dhex-diisa iyo dibaddiisaba. Waxaa jira layliyaal aan ku qorray gololo (Mawduuc) kasta dhammaadkiisa, layliyaalkaas waa tilmaan. Isticmaal iyaga iyo ku-wo aad ka soo dhex saartid cashar kasta.

Waxaan ka cudur-daaranaynaa, haddii ay jiraan wax ge-faf ah ama nuqsaan ah oo aad ku aragtaan buuggan guud ahaan. Shaqada qoraalka buuggu waxay ahayd degdeg, waa-na markii ugu horreysay oo la allifo buug noocan ah (Buugga Maaddada Barbaarinta iyo Cilmiga Beesha.

Waxaana waajib ah inaad wixii gef ah ama qalad ah oo aad aragtaan, Jaallayaal, la socod-siiya Xafiiska Manaahijta, ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta.

Waxaana ku han weyn nahay inuu buuggani noqdo mid dantii laga lahaa keena, ardayda Soomaaliyeedna faa'iido u yeesha.

«Eebbe ha ina waafajiyo».


Casharka Koowaad

# DALKEENNU WAA SOOMAALIYA

Dalkeennu waa Soomaaliya.
Dadkiisu waa Soomaali.
Wuxuu ku yaal Afrika.
Dalkeenna waan jecel nahay.
Wuxuu na siiyaa waxaan u baahan nahay.
Dalkeennu wuxuu na siiyaa biyaha aan cabno.
Caanaha aan dhanno, cuntada aan cunno.
Daawada cudurrada naga celisa.
Barwaaqadiisaan ku raaxaysannaa.
Dalkeenna waan jecel nahay.
Korkiisaan ku soconnaa.
Hawadiisaan ku neefsannaa.
Qorraxdiisaan ku diirsannaa.
Hooskiisaan harsannaa.
Dabeecadiisaan ku raaxaysannaa.

Dalkeennu waa barwaaqo,
waana qurux badan yahay.
Badda waa ku dabaalannaa.
Baddeennu waa barwaaqo.
Waxaa ka buuxa mallay.
Mallaygu wuu na anfacaa.
Mallayga waa cunnaa.
Qaarna waa gadannaa.
Waxaan ka hellaa lacag badan.
Waxaan leenahay warshado badan oo,
lagu sameeyo mallayga.
Waxaa ka mid ah :
Warshadda Qandala, iyo tan
Caluula, iyo tan Laas-Qoray.

Dabeecada dhulkeennu waa qurux badan tahay.
Waxuu dalkeennu leeyahay webiyaal iyo togag.
Waxaa uguna weyn :
Webiga Jubba, iyo webiga Shabeelle iyo waadiga Daroor.
Webiyaashu biyo badan bay na siiyaan.
Biyaha waxaan ku waraabsannaa beeraha.



**Mallaay**

Beeraha waxaan ka hellaa cuntadayada, sida : Masaggo, Galley, Moos, Bariis, Sonkor, Babay, Cambe, Qudaar, Suuf, Digir, Canab, Sisin iwm.



Moos

Dalkeennu waxa uu leeyahay dhul siman.
Waxa uu leeyahay Toomo iyo Hawd.
Waxaa noo daaqa dhulkaas Xoolaha.
Waxaan leenahay xoola badan; Geel, Ari, Lo'.
Xoolaha waa ku nool nahay.

Waxaan ka hellaa caano, hilib, harag iyo subag.
Hilibka iyo haragga, waxaan ka hellaa lacag badan.
Dalkeennu waxa uu leeyahay Buuro.
Buuruhu faa'iido badan bay leeyihiin.
Buuruhu qurux bay leeyihiin.

Buuruhu waxay soo jiidaan daruurta.
Buuraha waxaa ka baxa geedo.
Buuraha xoolahaa inoo daaqa mar mar.
Waxaana ka baxa geedka beeyada,
geedka beeyadu waa qaali.
Waxa uu leeyahay xabag.
Xabagtiisu waa qaali.
Lacag badan baan ka hellaa xabagta beeyada.
Dalkeena waxaa ku badan Ugaarta, iyo Dugaagga.
Dhulkeenna waxaa ku badan, Maroodiga, Geriga,
Biciidka, Cawsha, Goodirka, Shabeelka, Goroyada,
Libaaxa, Sagaarada, iyo kuwo kale oo tira badan.
Dalkeenna waxaa loo yimaadaa dalxiis, iyo tamashle.


Adduunkoo dhan ayaa looga yimaaddaa,

in la arko quruxdiisa iyo taariikhdiisa.
Dalkeennu waxa uu leeyahay taariikh dheer. Kumayaal sano ka hor, dalkeennu xiriir buu la lahaa dunida kale. Waxaa laga gadan jirey badeeco badan, oo ay ka mid ahayd :


Foolka Maroodiga, Baalka Goroyada, Dharka, Fooxa, ama Luubaanta.
Dalkeenna waxaa lagu magacaabi jirey (Dalkii Udugga)
Siyaasadda Dalkeennu waa dhexdhexaad.
Mabda'iisu waa Hantiwadaag.
Dadkiisu waa Islaam.
Hoggaamiyhiisu waa Jaalle Siyaad.



Ugaar iyo Dugaag



**Wabi**



Guryo iyo Doonyo

**Laylis :**

1. Halkee buu ku yaal dalkeennu?

2. Muxuu na siiyaa dalkeennu?

3. Yaa na siiya waxa aynu ku nool nahay?

4. Baddeennu waa tee? Waase maxay faa'iidada aynu ka hellaa?

5. Waxtar ma u leeyahay Kalluunku noloshayada?

6. Intee webi ayaynu leenahay? Maxayse noo taraan?

7. Maxay na siiyaan xooluhu?

8. Waa maxay faa'iidada ay leeyihiin buuruhu?

9. Ma laga helaa dalkeenna dugaag? Maxaase ka mid ah?

10. Ma yahay dhulkeennu dal dalxiis loo yimaado?

11. Dunidu maxay ka qaadan jirtay dalkeena? Maxaase la oran jiray?

12. Mabda'eennu waa kee? Yaase hoggaamiye u ah?

Casharka Labaad

## UBAXA KACAANKA OKTOOBAR (UKO)



Ubaxa Kacaanka Oktoobar waa ururka ardayda yar yarka ah ee da'doodu tahay 7-14 sano. Ardayda yar yarka ah ee uxaba dalka, waa indhaha Ummadda, waa madaxda mustaqbalka, waa iftiinka Kacaanka.

**Tilmaamaha ilmaha ku jira :**

Ardayga Ubaxa Kacaanka ku jira wuu ka duwan yahay ilmaha kale ee la filka ah,

Ilmaha ubaxa ku jira macallinkooda way dhegeystaan.
Xisadda dhexdeeda kuma hadlaan, waxay si fiican
u dhegeystaan sharaxa macallinka, casharka la siiyana,
way soo bartaan.

Wixii loo dhigo ma aqoon waayaan.
Ardayga ubaxa ku jira weligiisba waa nadiif.
Dharkiisu waa nadiif.
Kabahiisu waa nadiif, timihiisu waa nadiif.
Oogadiisu waa nadiif.

Wasakhda waa neceb yahay, meeshuu seexdo, iyo meeshuu wax ku cuno, iyo meeshuu wax ku barto waa ka dhawraa wasakhda. Hadduu ku arko wasakhna waa ka qaadaa.


Ardayda ubaxu nadaafadda waa jecel yihiin.
Ilmaha ubaxa kacaanku edeb bay leeyihiin.
Isma caayaan, isma diriraan, wax iskama qaadaan, qofna ma inkiraan.

Waa isjecel yihiin, waa walaalo, waa jaallayaal.
Dadka kale wax kama sheegaan oo ma dhibaan.
Dadku waa waalidkood ama waa walaalkood, waa wada xurmeeyaan.

Ilmaha ubaxu waa dhega nugul yihiin, waalidkooda, walaalahooda ka waaweyn iyo qof kasta oo ka da' weyn, wax kama diidaan.

Ardayda ubaxu been ma sheegaan. Waxaa lagu yaqaan run. Waxaa lagu tilmaamaa runlowyaal, ama runsheegayaal.
Ubaxu ma baqaan. Waa geesiyaal, waxaa lagu magaabaa geesiyaasha yar yar ama libaaxyada yar yar.
Maraka ay qaadayaan heesta calanka iyo heesaha Kacaanka, codkoodu waa dheer yahay.

Waxaa la moodaa onkod, ama jibin dhacday.
Fulayga iyo cadawgu waa ka baqaan.
Ubaxu caajis ma yaqaaniin.
Mar kasta waa firfircoon yihiin.
Ma daalaan. Ardayda ubaxu ma daahaan.
Kamana baaqdaan dugsiga. Waxay yimaadaan waqtigiisa,
Nidaamka iyo asluubta dugsiga waa dhowraan.
Sidoo kale, gurigooda asluubtiisa waa ilaaliyaan.
Waalidkooda waa jecel yihiin. Walaalahooda waa jecel yihiin.



**Ubaxa Kacaanka Oktoobar**

Dariskooda waa jecel yihiin.
Dadkoo dhan waa jecel yihiin. Maxaa jira UKO waa ilmaha ugu edeb badan oo ugu fiican.
Waa UKO. Waa indhaha Ummadda.

**UKO Calanka waa jecel yihiin**

Ardayda UKO calankooda waa jecel yihiin.
Marka la saarayo, waa u istaagaan, waana salaamaan.
Marka la dejinayo, waa u istaagaan, waana salaamaan.
Waxay ku dhaarsan yihiin inay daafacaan.
Waxay ku dhaarsan yihiin cadawga inay ka celiyaan.
Waxay ku dhaarsan yihiin inay u dhintaan calankooda.

**Ardayda UKO Waddankooda waa jecel yihiin**

Waxay wax u bartaan waddanakooda Soomaaliya.
Waxay u korayaan waddankooda Soomaaliya.
Waxay u shaqeeyaan una shaqeen doonaan Waddankooda Soomaaliya. Marka ay weynaadaan.
Ardayda UKO waxay leeyihiin calaamad gaar ah.
oo lagu yaqaan.

Waxaa calaamad u ah surwaal gaaban oo midabkiisu u egyahay midabka cirka.

shaar cad oo gacmo gaab ah. Koofiyad bulug ah oo dhexda xiddig ku leh, iyo masar bulug ah oo ay qorta ku xirtaan.

Masarka bulugga ahi waa calankooda.
Calankooda waa jecel yihiin sidaa ayey qoorta ugu xirtaan.

Casharka Saddexaad

## JAALLE SIYAAD



**Jaalle Siyaad**

Jaalle Maxamed Siyaad Barre waa geesiga Ummadda Soomaaliyeed.

Waa hoggaamiyaha Kacaanka Oktoobar.
Siyaad waa Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka.
Waa Madaxweynaha Dalka Soomaaliya.
Jaalle Siyaad waxa uu ka dhashay qoys Soomaali ah oo wanaagsan.

Waxa uu ku dhashay Garbahaarey.
Garbahaarey waa caasimadda Gobolka Gedo.

Maxamed Siyaad qoyskoodu waa jeclaayeen. Wuxuu ahaa wiil dhega nugul, oo shaqo badan.

Wixii loo diro degdeg buu u qaban jirey.

Shaqada, «Siyaad» waa jeclaa.
Markii uu yaraa ayaa Siyaad la geeyey dugsi quraan.
Siyaad waa fahmo badnaa.
Waana dadaal badnaa. Degdeg ayuu Qur'aanka u bartay.
Markii uu yaraa, Siyaad aad baa loo jeclaa.
Waxa uu ahaa wiil akhlaaq iyo asluub badan.
Dadka aad buu u ixtiraami jirey : Waalidkii,

Walaalihii, iyo dadka ka weyn oo dhan.
Siyaad waxa uu la shaqeeyn jirey qoyskooda.
Waxa uu ilaalin jirey xoolaha.
Wax buu ka oodi jirey oo wax buu ka waraabin jirey xoolaha.
Yaraantiisii, Siyaad, waxa uu lahaa karti, iyo waxtar badan.
Siyaad waxa uu ahaa wiil firfircoon.

Waqtiga shaqo ayna jirin, ma iska fadhiyi jirin.
Waxa uu jeclaa cayaaraha, sida : fardo fuulka, bootinta, tartanka, gantaasha, warafka, rakuubka, iwm.
Siyaad markii uu weynaadey ayuu yimid Muqdisho.
Waxa uu la kulmay askar caddaan ah. Askartu waxay ahayd Ingiriis.

Ingiriis waxa uu ahaa gumeysi dalkeenna haysta.
Siyaad waxa uu arkay sida uu isticmaarku u dhibayo Soomaalida.
Aad buu uga xumaaday. Isla markiiba waa neocaystay Gumeystaha.

Waxa uu isweydiiyey :
Maxaa keenay gaalada dhulkaaga?
Gaaladu maxay rabaan? Xaggee ka yimaadeen?
Siyaad ma aqoon dabeecadda gaalada iyo sirtooda.
Waxa uu is weydiiyay sidee u bartaa sirta gaalada?

Waxa uu goostay in uu ka mid noqdo askarta isticmaarka.
Markaasuu qortay askarta.
Markii hore, waxa uu u muujiyey Ingiriiska shaqo badan, dadaal, iyo niyo fiican.
Madaxda askartu way jeclaadeen.
Waxay moodeen in uu Siyaad daacad u yahay.

Siyaad marna daacad uma ahayn.
Waxa uu isaga dhigi jirey daacad.
Laakiin waa siri jirey, waxa uu ku dadaali jirey in uu fahmo sirtooda. Khayaanadooda iyo ujeeddadooda dambe.

Siyaad waxa uu ogaaday xumaanta cadowga.
Waxa uu ku taahi jirey dagaalka cadowga.
Cadawga waa in lala dagaalamaa, ayuu ku oran jirey Jaallayaashiis.

Waxa uu oran jirey xoog iyo xeelaba waa in lagu la dagaallamaa.
Waxa uu ka sheekayn jirey fiicnaanta xorriyadda, iyo xumaanta gumeysiga. Dadkii oo dhami waxay garteen xumaanta isticmaarka.

Waxay ku heshiiyeen inay la dagaallamaan.
Waxay sameysteen urur.
Ururka waxaa la oran jirey Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed.
Jaalle Siyaad ururkaas ayuu la shaqeyn jirey.
Si qarsoodi ah ayuu ula shaqeyn jirey.
Waxa uu uga soo warrami jirey sirta cadowga iyo waxa uu doonayo in uu sameeyo.

Asaga iyo jaallayaalkiisu waxay bixin jireen lacag.
Waxaa kale oo ay u soo ururin jireen hubka iyo rasaasta lagula diriro cadowga.

Jaalle Siyaad waxa uu caan ku ahaa geesinimo, deeq, waddaninimo, qiirad iyo shaqo badnaan.
Jaalle Siyaad iyo dhallinyaradii kale ee Soomaaliyeed waa ka adkaadeen isticmaarkii. Dalkeennu xor buu noqday.
Calanka Soomaaliya ayaa la saaray.
Markuu gumeysigii tegey, waxaa madax noqday niman Soomaali ah oo aan fiicnayn.
Nimankaas waxaa loo bixiyay **musuq-maasuq.**
Waxaa loogu baxshey dadkii bay kala qaybiyeen, oo isku direen, lacagtii dadweynaha waa kala qaybsadeen.

Dalkiina kama ayna shaqayn. Waxaa batay tuugadii, dilkii, dhacii, beentii, caajisnimadii iyo jahligii.
Jaalle Siyaad aad buu u niyad jabay.

Aad buu uga xumaaday sida dadkii iyo dalkii loo galay. Aad buu u ciishooday. Waxa uu la sheekaysan jirey Saaxiibadii, gaar ahaan kuwa ku jira xoogga dalka, booliska, shaqaalaha iyo ardayda.
Waxa uu kala sheekaysan jirey sida loo beddeli karo maamulka dalka, waxay is oran jireen : kacaan keliya. ayaa lagu beddeli karaa maamulka dalka.
Ugu dambaystii, kacaankii waxay dhaliyeen 21kii Oktoobar, 1969. Musuq-maasuqii waa la baabi'iyey.
Hadda, Jaalle Siyaad waa Guddoomiyaha G.S.K. Hoggaamiyaha Ummadda Soomaaliyeed, waa geesiga, Soomaaliya iyo Afrika.

Jaalle Siyaad waa jecel nahay, annaga ayuu noo shaqeeyaa. Tacliintayada, nabadgelyada, shaqadayada, mustaqbalkayaga, Waxaas oo dhan asagaa ka fakara. Waxa uu sharci nooga dhigay :
Caddaalad, siinaan, shaqo, walaalnimo iyo isjecayl.

**Layli :**

1. Waa kee Jaalle Siyaad?
2. Halkee buu ku dhashay? Waase Gobolkee?
3. Quraanka ma bartay Jaalle Siyaad?
4. Wax ka sheeg akhlaaqdiisa intii uu yaraa?
5. Muxuu qaban jirey waqtiga uu firaaqada yahay?
6. Markii uu yimid Xamar muxuu ku arkay? Muxuuse isweydiiyey?
7. Ma kula shaqeysan jirey daacad askarta isticmaarka?
8. Ma jeclaa gaalada? Mase guubaabin jirey Jaallayaashii?
9. Jaalle Siyaad sidee buu ku la shaqeeysan jirey gaalada?
10. Sheeg wixii uu Jaalle Siyaad caan ku ahaa?
11. Yaa caawini jirey ururka dhallinyarada?

12. Kee baa adkaaday dhallintii iyo gumeystahii?

13. Yaa dalkeenna xukumay gobannimadii ka bacdi?

Yaase qaybiyey dadkeenna?

14. Maka xumaaday Jaalle Siyaad xukuumadihii musuq-maasuqa?

15. Yuu la tashan jirey? Yaase dhaliyey Kacaanka 21ka Oktoobar?

16. Waa kee Madaxweynaha Ummadda?

17. Ma jeceshahay Jaalle Siyaad?

Casharka Afaraad

## DHAGAXTUUR WAA TILMAAN GEESINIMO

Dhagaxtuur waa tilmaan geesinimo, waa meel ay ku dhinteen rag iyo dumar xuriyo u dagaallamaya.

Waa goob xorriyo oo gaalo badan lagu laayey, Dhagaxtuur waxaa ku dagaallamay gumeysigii Ingiriiska iyo Xisbigii dhallinyarada Soomaaliyeed ee dagaalka galay isagoo aan hub haysan.

Waxay ku dagaallamayeen geesinnimo iyo niyad waddaninimo. Waxaa hub u ahaa dhagax iyo wax la mid ah.

Isticmaarku waxa uu dadkii ku furay rasaas iyo bombooyin. Soomaalidu waxay kala hor tageen dhagaxaan iyo ulo iyo wixii ay heli kareen. Dhagaxii ayaa lagaga adkaaday gaaladii Isticmaarka ahayd. Dagaalkii meeshaas ka dhacay waxaa loo baxshay (Dagaalkii Dhagaxtuur).


Waxaa loogu baxshay gaaladii baa lagu la diriray dhagxaan. Hadda dhagaxtuur waxay noo tahay tilmaan waddaninmo, tilmaan geesinimo oo aan la illaawi karin.
Waa meel taariikh weyn leh. Waa meel xusuus taariikheed noo leh.

Weligayn illaawi mayno taariikhda Dhagaxtuur.
Taariikhda Dhagaxtuur waxaa soo nooleeyey kacaankii 21kii Oktoobar 1969kii.

Oktoobar waa tilmaan gobannimo, waa calaamad xurriyadeed. Waana tusmo waddaninimo. Waa mid doonaysa mar walba guusha ummadda iyo barwaaqadeeda.

Oktoobar bilaha waa u jecel nahay.
Kacaankayaga Oktoobar buu dhashay. Waxaa dhaliyey shacabkeenna Soomaaliyeed ee geesiga ah.
Waxa ka madax ahaa geesiyaasha ku jira Golaha Sare ee Kacaanka.

Waxaa hoggmiye u ahaa Jaalle Maxamed Siyaad Barre.



**Taallada Dhagaxtuur**

Kacaankeenna barakaysanu waxa uu dib u nooleeyey sharaftii Ummadda Soomaaliyeed.

Kacaanku wuxuu keenay caddaalad, sinnaan, midnimo, nabad iyo horumar.

Kacaanku waxa uu soo nooleeyey taariikhdii dadka Soomaaliyeed.

Waxa uu bilaabay kacaanku in uu xusuuso u sameeyo taariikhda dadka Soomaaliyeed iyo geesiyaashiisii.

Xusuusahaa waxa ka mid ah Taallada Dhagaxtuur, Taallada Xaawa Taako, Taallada Sayid Maxamed Cabdulle Xasan, Taallada Daljiraha Daahsoon.

Meela kale oo muhim ahna waxaa loogu magac daray rag taariikh ku yeeshay shaqadii ay qabteen sida: Jeneraal Daa'uud Cabdulle, Yuusuf Kawneyn, Yaasiin Xaaji Cismaan, Sakhawadiin, sheekh Xasan Barsane, Maxamed Cabdulle Xalane, Sheekh Bashiir iyo kuwo kale oo badan .

**Layli :**

1. Waa maxay Dhagaxtuur? Yaase ku dagaallamay?
2. Soomaalidu maxay kula dagaallantay gumeystaha?
3. Yaa ku dagaallamay rasaasta?
4. Sidee ku dhashay magaca Dhagaxtuur?
5. Yaa nooleeyey taariikhda Dhagaxtuur? Yaase dhaliyey Kacaanka 21ka Oktoobar?
6. Ma jeceshahay Oktoobar?
7. Kacaanku muxuu u keenay Ummadda Soomaaliyeed?
8. Waa maxay xusuusaha uu sameeyey Kacaanku?

Casharka Shanaad

# ISKAA WAX U QABSO

## ISLA JIR, ISLA SHAQAYN, ISJECAYL



ISLA JIR

Isla jirku waa fiican yahay; ma noolaan lahayn haddaan laysla jirin? Haddaan la wada jirin ma noolaaneen.
Wada jirka qoyska ayaa noloshu ka abuurantaa,
Waxaa na xannaaneeya ama wax na tara dad badan oo wada jira.

**Walaalka, waalidka, dariska, dadaweynaha kale** iyo **dawladda.** Waxaan cunnu, waxaan cabno, waxaan xiranno, waxaan huwanno, meeshaan seexanno, waxbarashada, daawada iyo wixii aan u baahanno. Waxaan ku hellaa isla jirka dadka, laga bilaabo Aabbe iyo Hooyo ilaa qof kasta oo beesha ku dhex nool.

Dadkaa oo dhani iskood bay isugu yimaadaan oo ay wax

u wada qabsadaan, si ay noo xannaaneeyaan, ayaguna ya dhexdooda wax u wada qabsadaan.

Haddaba, isla jirku waa fiican yahay, waa lagama maarmaan.

## ISLA SHAQAYN

Shaqadu waa waajib, waana lagama maarmaan.
Shaqadu waa kala fiican tahay.

Shaqo waxaa ugu fiican tii la wada qabto, oo
Laga wada shaqeeyo, maxaa jira way khayr badan tahay.

Dugsi qof keligi ma dhisi karaa? Mase ka shaqayn karaa?

Isbitaal qof keligi ma dhisi karaa? Mase ka shaqayn karaa?

Beer weyn qof keligii ma fali karaa? Mase goyn karaa?

Xoolo badan qof keligi ma shubi karaa? Mase xannaanayn karaa?

Waxaas oo dhan qofna keligi ma qaban karo.

Shaqooyinkaas oo dhan waxaa qaban kara dadkoo iskood uga wada shaqeeya.

Shaqada iskeed loo wada qabto waa shaqo raalli laga wada yahay oo faa'iido badan leh.

Waxaana la yiraahdaa **Iskaa Wax U Qabso.**

Marka **isla shaqayni waa Iskaa Wax U Qabso.**

## ISJECAYL

Dadku haddii uu is neceb yahay isuma iman kareen, mana wada shaqaysan kareen oo wax ma wada qabsan kareen.

Dadku hadday is neceb yihiin, dugsi ma wada dhisan karaan?

Waxse ma wada baran karaan? Magaalada ma wada degganaan karaan?

Oo daris ma noqon karaan? Isbitaal ma dhisan karaan?

Ma wada qabsan karaan shaqa oo ay u wada baahan yihiin?

Haddii aan lays jeclayn laysuma imaan karo.

Lama wada degi karo, waxna lama wada qabsan karo.

Waxaa la wada degi karaa oo wax la wada qabsan karaa marka lays jecel yahay.

Haddaba wada jirku iyo wada shaqeyntu waa isjecayl.

Wada jirka iyo isla shaqeyntu waa Iskaa Wax U Qabso.

## ISKAA WAX U QABSA WAA ISJECAYL

Dadkeenna Soomaaliyeed waa wada shaqaystaan.

Waa is wada jecel yihiin.

Waxay ku dhaqmaan Hantiwadaag.

Waxay ku dhisaan dhulkooda Iskaa Wax U Qabso.

**L e y l i :**

1. Waa maxay Iskaa wax u qabso?
2. Qof keligii isbitaal ma dhisi karaa?
3. Qof keligii dugsi ma dhisi karaa?
4. Aabbe, Hooyo iyo dariska mala shaqeysaa?
5. Isla jirka ma fiican yahay?

Casharka Lexaad

## HOOYO HANTIWADAAG AH

Mujtamaca hantiwadaagga ahi waxa uu ku dhisan yahay akhlaaq; waddaninimo, wadajir, karti iyo kalsooni.

Qofka bani-aadmiga ah waxaa ababiya mujtamaca.
Mujtamacana waxaa dhisa qofka.

Haddaba mujtamaca hantiwadaagga ahi waxa uu ku dhisan yahay wadajirka dadkiisa. Sidaas draaddeed ayaa mabda'a Hawl iyo Hantiwadaagga ahi diidaya kala tagga iyo is xasadka. Waxa uu doonayaa midnimada iyo isku duubanaanta.

**Tusaale :**

Xaliimo waa hooyada qoyska.
Aroorta hore ayey toostaa Xaliimo.
Waxay diyaarisaa quraacda carruurta.

Shanta iyo barka ayey carruurta ka toosisaa hurdada.
Markaa ayey u qabaysaa carruurta yar yar.
Lixda iyo barka miiska ayey wada fariistaan.

Saacaddu marka ay tahay toddobada iyo shan iyo afartan mirir yey geysaa carruurta dugsiga.

Marka ay tahay siddeedda subaxnimo ayey u diyaar noqotaa shaqada.

Xaliimo waa hooyo ka shaqeysa beeraha.

Waxay qaadataa qalabka tacabka beeraha **Yaambo** iyo Shooko.

Waxay beerta ka gurtaa cawska iyo dhirta yar yar.
Waxayna ka xaaqdaa qashinka ka hara falliinka.
Markaas ayey carra geddisaa meesha cusub.

Xaliimo waa hooyo hantiwadaag ah oo ku fakarta waajibka dalkeeda. Waxay aamminsan tahay sinnaanta dadkeeda.

Markaa ayey isweydiisaa su'aalo :
Mujtamaca hantiwadaagga ahi muxuu u baahan yahay?



**Hooyo Hantiwadaag ah**

Ma qoyskayaga oo qura ayaan u shaqeeyaa? Mase dalkayaga iyo dadkeyga? Iyada ayaana isu jawaabta oo is ti·raahda maya!! ee waxaan u shaqeeyaa dalkeyga iyo dadkeyga.

Waa inaan shaqada siyaadiyaa si waxa soo baxaa ay u bataan.

Dalkeygu waxa uu u baahan yahay xoolo badan si uu isugu fillaado.

Xaliimo waa hooyo aan daalin oo kacaan ah.

Maskaxda waxay ku haysaa tusaalooyinka madaxweynaha oo ah :

«Naftu waxay doontaa hurdo, cunto, nasasho, taasina waxay qofka geyeysiisaa gunnimo, gaajo iyo jahli».

Marka ayaa waxaa ku abuurma nafsadda Xaliimo hawo cusub waxayna halmaantaa dareensiga daalka.

Saacaddu marka ay tahay kowda duhurnnimo ayey Xaliimo ka soo noqotaa tacabka beerta.

Toos ayey u aaddaa suuqa, waxay ka soo iibsataa raashinka qoyska.

Xaliimo waa hooyo fara fudud, aadna u shaqa badan.

Dhaqso waxay u diyaar gareysaa qadada qoyska.
Saacaddu marka ay tahay labada ayey qadada siisaa carruurta.

Dabadeedna wey seexisaa, cayaarisaa, haddana wax bay bartaa. Haddana marka ay saacaddu afarta tahay ayay ku noqotaa shaqada.

Lixda galabnimo ayeyna ka soo laabataa shaqada.

Markaa ayey diyaar gareysaa cashada carruurta oo ay siisaa.




Hooyo Hantiwadaag ah



**Hooyo Hantiwadaag ah**



**Hooyo Hantiwadaag ah**



Hooyo Hantiwadaag ah

Saacaddu marka ay tahay siddeedda fiidnimo ayey aaddaa Golaha Hanuuninta Ummadda.

Halkaas oo ay madax ka tahay Guddiga Hooyooyinka xaafadda.

Isla markaana Xaliimo waa ardayad wax ka barata dugsiyada haweenka si ay u kordhiso tacliinteeda iyo fikradaheeda. In badan ayeyna qaadatay shahaado sharaf iyo billado lagu siiyey hawl karnimo, laguna tilmaamay inay tahay geesiyadda dalka.

Haddaba Xaliimo waa hooyo kacaan ah oo aamminsan mabda'a hawl iyo hantiwadaagga.

Waa hooyo geesiyad ah oo aan daalin afar iyo labaatanka saac.

«Waa nafteeda hurto ..... Waana waddaniyad».

**Layli :**

1. Muxuu mujtamac ka dhismi karaa?
2. Mujtamaca hantiwadaagga ahi muxuu u baahan yahay?
3. Waa ayo Xaliimo? Yaase diyaariya quraacda?
4. Halkee bay ka shaqeysaa Xaliimo? Yayse u shaqaysaa?
5. Waa maxay tusaalaha ay is dareensiiso?
6. Maxay ka tahay Xaliimo Golaha? Maxayse baratаa?
7. Xaliimo ma tahay Kacaan?

Casharka Toddobaad

## AABBAHA HANTIWADAAGGA AH

Raage waa aabbe hantiwadaag ah.
Qoyskiisu wuxuu ka kooban yahay isaga, afar carruur ah iyo hooyadood.

Waa nin kalluumaysta ah oo aqoon u leh baxaarnimada. Saddexda aroornimo ayuu ka toosaa Raage hurdada. Wuxuu isu diyaariyaa shaqada.

Raage wuxuu leeyahay huuri yar oo uu ku shaqaysto.
Subax walba wuxuu ku kallahaa badda. Wuxuuna qaataa sahaydiisa.
Raage waxa uu leeyahay saaxiiba kale, waana iskaashato madax bannaan oo maasha muruqeeda.
Baddeennu waa barwaaqo, khayraadkeedana lama koobi karo.

Waxaa laga helaa : Kalluunka, Luulka, Kalxanta, Qubada iyo Libaaxa qaaliga ku ah adduunka.
Marka ay tahay labada duhurnimo ayuu ka soo laabtaa shaqada.

Noocyaal badan oo mallay ah ayuu la soo noqdaa, kuna iibshaa suuqa. Asaga iyo saaxibbadiisu waxay ka helaan lacag aad u fara badan. Raage qoyskiisa iyo carruurtiisa ayuu ku korsadaa waxa uu soo helo, inta soo hartana wuxuu ku kaydsadaa Bangiga Qaranka.

Raage waa nin maddaale ah.
Waana Guulwade ka tirsan xaafadda uu deggan yahay.

Isla markaa waa bare ka shaqeeya Ololaha, oo wax bara walaalihiisa Soomaaliyeed. Jaallayaashiisu aad bay u jecel yihiin, waayo waa maddaale, ma hurde, ma nooge, had walbana waa heegan. Galab walba afarta iyo barka ayuu ka qayb galaa Raage Iskaa Wax U Qabso, lixdana wuu soo laabtaa.

Marka ay tahay siddeedda fiidnimo ayuu Raage tagaa Golaha Hanuuninta. Raage wuxuu madax ka yahay laanta dhallinyarada, casharro hanuunin ah iyo waano ayuu ka bixiyaa mar walba.



Aabbaha Hantiwadaagga ah

Raage waa Guulwade. Guulwaduhu waa qofka aamminsan mabda'a hantiwadaagga ee u horseeda danaha dadka iyo dalkaba.

Guulwade waa kan ka soo horjeeda dibusocodka, kana horjeeda cadawga gudaha iyo kan dibeddaba.

Waxaad aragtaa Guulwade meereysanaya oo taagan gees walba.

Waxaad aragtaa Guulwade u socda koox koox, kana kooban rag iyo dumar. Haddaba Raage oo ka tirsan kooxda Guulwadayaasha waxa uu in badan muteystay billado geesinimo oo shahaado ah.

Waxa uu ku caan baxay kacaannimo, hantiwadaagnimo iyo waddaninimo.

**Layli :**

1. Waa kuma Raage? Goormuuse ka toosaa hurdada?
2. Kalluunnku ma ku badan yahay baddayada?
3. Raage ma leeyahay saaxiibbo? Ayayse yihiin?
4. Yuu siiyaa Raage lacagta?
5. Muxuu ka yahay Xaafadda? Mase ka qayb galaa Iskaa Waxx U Qabso?
6. Muxuu ku qaatay billadda sharafta?

Casharka Sideedaad

## XIRFADAHA KALA GEDDISAN

Dadku keli keli ama qof qof uma noolaan karo. Waxaa loo baahan yahay wada jir ,wada noolaan, iskaashi, Jaallannimo, iyo wada shaqeyn. Isbahaysi ayeyna ku noolaan karaan oo ay ku yeelan karaan xoog iyo xoolo.

Qofku waxa uu u baahan yahay waxyaalo badan oo kala duwan.

Waxa uu u baahan yahay cunto, biyo, guri, dhar, kabo, daawo, tacliin, nabad, alaab uu wax ku qabsado iyo waxyaabo badan oo kala geddisan.

Dhammaan waxaas uu qofku u baahan yahay keligiisa ma qabsan karo.

Waxaa lagama maarmaan ah in qofku shaqo qabto, qof beerta fala, oo cunta soo saaro, qof xoolaha ilaaliya oo caano. hilib iyo harag soo saara.

Qof dharka sameeyo, qof kabaha tolo, qof yaqaan sameynta daawada. Qof biyaha ka shaqeeya, qof guryaha dhisa, qofna qoryaha, ama dhuxusha ka shaqeeyo .

Waxaa loo baahan yahay qof birta tuma, qof dadka wax bara oo macllin noqda, qof nabadda ka shaqeeya sida millatariga, booliska, guulwadayaasha iwm.

Qofku wax loo baahan yahay buu ka shaqeeyaa.

Qofba xirfad buu leeyahay, qofku waxa uu ka shaqeeya waa xirfadiisa.

**Tusaale : Xirfadaha kala duwan**

Xirfadda qofka wax beera waa beeraleey, beeraleydu innagey inoo shaqeeyaan. Waxay noo soo saaraan waxa aan cunno ama cabno sida galley, Maseggo, sonkor, cambe, babay iyo waxaan xiranno sida dharka (suufka).

Xirfadda dadka xoolaha raacaa waa xoolaley ama xoola dhaqato.

Xoola dhaqatadu shaqo fiican bay inoo hayaan, waayo xoolaha waxaan ka helnaa caano, hilib, harag, subag iyo wax-yaalo kale oo badan.

Dadka daba mallayga xirfadoodu waxaa weeye kalluu-meysato waxay noo soo dabaan kalluunka ama mallayga.

Mallaygu waa fiican yahay, hilib ,saliid iyo waxyaalo kale ayaan ka helnaa.

Dadka ka shaqeeya waxbarashada xirfadoodu waxa wee-ye macallinnimo.

Waxbarashadana waan u baahan nahay : qofkii wax aan aqoon waa jaahil, jaahilna waa wax matare, waxna ma arko.

Qofka ka shaqeeya birta xirfadiisu waa bir maale, waxa uuna noo sameeyaa alaabta aan ku isticmaallo sida mindiyaha fargeetada, masaarta, alaabta beeraha lagaga shaqeeyo, baa-buurta iwm.

Dadka ka shaqeeya biyaha, xaabada ama dhuxusha, xa-fiisyada, tijaaradda ama ganacsiga, nadaafadda iwm., ayaguna qofba xirfad buu hayaa.

Dhammaan dadkaas xirfadaha kala geddisan hayaa shaqo weyn bay ummadda u hayaan.

Waxay ka shaqeeyaan waxa beeshu ku nooshahay.

Ayaguna ma kala maarmi karaan, qofba qof buu u baahan yahay.

Qofba qof buu ku tiirsan yahay. Dhammaantooda waa isjecel yihiin, waxay naga mudan yihiin sharaf iyo jeceyl.

**Laylis :-**

1. Keli keli ma loo noolaan karaa?
2. Wadajirka ma loo baahan yahay?

3. Xirfadaha dadku ma kala yihiin jaad jaad?

4. Wax ka sheeg xirfadaha?

5. Waa maxay xirfadda xoola dhaqatadu? Mase loo baahan yahay?

6. Kalluumeystuhu muxuu noo taraa?

7. Yaa dadka waxbara?

8. Waxtar ma noo leeyahay biyooluhu?

9. Maxay nooga baahan yihiin dadka ka shaqeeya xirfadaha?

Casharka Sagaalaad

## DALKEYGA AAN DAAFACO
### Wiil geesi ah

Sheekadani waxay ku saabsan tahay nin geesi ah oo u geeriyooday gobannimada waddanka Soomaaliyeed intii uu gumeysigu gacanta ku hayey.

Waxaa jiri jirey wiil la yiraahdo «Warsame».
Waxa uu ahaa Warsame wiil madi ah.
Aabbihii iyo hooyadii aad bay u jeclaayeen.
Waxa uuna ka dhashay qoys reer baadiya ah.
Warsame intii uu yaraa waxa uu raaci jirey waxaraha.
Markii uu gaaray shan sano ayaa la geeyey dugsi quraan.

Dhaqsana waxa uu u dhammeeyey quraanka.
Barahiisa iyo waalidkiisba aad bay u jeclaayeen.
Waayo waxa uu ahaa wiil aad u firfircoon.
Aad buu u edeb iyo akhlaaq wanaagsanaa.

Subax walba Warsame waxa uu salaami jirey aabbihii iyo hooyadii.

Warsame markii uu dhammeeyey waxbarashadii quraanka, waxa uu noqday hoggaamiyaha qoyska.

Waxa uu la wareegey xilkii qoyska.
Waxa uu ahaa sahamiyaha qoyska iyo tacbadaha beerta.
Waxa uu ahaa wiil geesi ah.
Waxaa loo yiqiin «Warsame Libaax».
Waayo, waxaa dhacday in geel ka lumay qoyskii Warsame.

Warsame geelii buu baadi doonay. Laakiin dhaqso uma helin.

Laba habeen iyo laba maalmood ayuu doonayay.
Isaga oo aan waxna cabbin waxna cunin.
Warsame waa wiil fariid ah, kama tago hubka dagaalka.
Waxa uu watay Warsame : **eebo, gaashaan iyo hankool.**

Hase yeeshee Warsame oo fikirsan, ayaa waxaa ku soo baxay goor ay maqribkii tahay saddex libaax.



**Warsame oo dugsi Quraanka ku jira**



**Warsame oo geelii raadinaya**

Hal ka mid ah, ayaa ku soo boodey Warsame oo ay isqabsadeen.

Geesigu waa ma nexe, gasha ayuu ka dhufsaday toorrey laba aaf leh.

Markaasuu libaaxii, la dhacay waana diley.
Dabadeed Warsame wuu soo helay geelii markaas qoyskii buu kula soo laabtay.

Maalin kale oo maalmaha ka mid ah ayuu Warsame weydiistey aabbihii inuu u raaco magaalada, aabbe waa ka oggolaaday.

Magaalada wuu ka fogaa qoyska Warsame.
Afar maalmood ka dib ayey tageen magaaladii.
Halkaas ayuu Warsame ku arkay dad aad u badan, gaar ahaan dhallinyaro fadhfadhida iyo odiyaal jareysanaya.

Warsame wuu la yaabay, su'aal ayuuna weydiiyey aabbihii, waxa uu yiri «waa maxay dadkan aan shaqeysaneynin»?

Dadka reer magaalka ahi waa ma shaqeystayaal ayuu yiri aabbihii.
Warsame wuu yaabay, waayo, waxa uu rumeysnaa murtida oraneysa :

«Nin dhashay ama dhimay ama dhidid».
«Nimaan dhididin ma helo dheef».

Marka aabbihii baa gacanta qabtay, oo ay isu raaceen «Masaajidka».

Mar labaad wuxuu arkay askar caddaan ah oo karbaashysa rag Soomaali ah oo garba qaawan, dhiigguna ka da'aayo dushooda.

Warsame wuu yaabay.
Waxa uu weydiiyey aabbihii su'aal kale :

Waa maxay askartan caddaanka ah ee karbaasheysa ragga Soomaaliyeed?

Waa askartii gumeysiga, waana kuwa xukuma dalkeenna iyo dadkeenna ayuu yiri aabbihii.

Innaguna waxaynu nahay raaciyadiisii aabbihii baa yiri.



**Warsame oo libaaxii dilaya**

Warsame, ashqaraar ayaa ku dhacay.

Markaasuu isweydiiyey ma annagaa is xukunna mase nin cad baa na xukuma?

Waa maxay gardarrada caddaanka ahi?

Ma dalkeyga iyo dadkeyga ayaa nin kale u talin karaa?

Warsame oo yaabsan ayaa aabbihii mar kale gacanta qabtay oo uu kula noqday qoyskii.

In yar dabadeed ayaa Warsame haddana arkay rag kale oo meel ku shirsan.

Waxa uu moodey rag beero falanaaya.

Hase yeeshee markii uu ku dhowaaday ayuu maqlay Warsame hees guubaaba ah, taas oo ahayd :

**«Soomaaliyeey toosoo, toosoo isku tiirsada ee**
**Hadba kiina taag daranay taageera weligiineey**
**Waxa aan la ooyaayo ilmadu iiga qubanayso**
**Ikhtiyaar nin loo diidoo, la addoonsadaan ahayee.**

Warsame waa istaagay, jirkiisii ayaa gariiray, jiriracyo ayuuu qaaday, ilmada ayuna qubay.

Warsame waxa uu xusuustay raggii Soomaaliyeed ee cadawgu karbaashayey.

Hase yeeshee, aabbihii oo gacanta haya ayaa dareemay wiilkii.

Warsame ayaa kor u eegay aabbihii oo weydiiyey.

«Waa maxay raggani aabbe»?

Waa dhallinyaro ka soo horjeeda isticmaarka, una dagaallamaysa gobannimada Soomaaliyeed, ayuu yiri aabbihii.

Warsame waxa uu goostay inuu ka mid noqdo dhallintaas.

Taariikhdu markii ay ahayd 1947dii ayuu Warsame ku biiray ururkii S.Y.L. Halkaas ayuu halgan cusub ka bilaabay.

Waxa uu in badan ka qayb galay bannaan baxyo iyo dagaallo fara badan.

Waxaa dhacday in Warsame oo ay wada jireen dhallintii gobannimadoonka ahayd ay isku heleen cadawgii gumaysiga meel u dhow gurigii S. Y. L. Isaga oo caraysan ayuu Warsa-

me cadawgii dhagxaan u ururisaday, markaas ayuu dadkii dhex jiiray, wauxuuna gaaray horjoogahii askarta gumaysiga. Dhagxaantii uu sitay ayuu madaxa kala dhacay horjoogihii. Goobtaas ayuu Warsame ku dilay hojoogihii askartii gumeysiga.

Halkaas askartii kale cagaha ayay wax ka dayday. Hase yeeshee, Warsame shirqool ayaa loo dhigay.

Waxaa qabtay rag Soomaaliyeed oo dibusocod ah oo daba dhilif u ahaa gumeystaha. Warsame markaa waa la xiray. Muuddo yar ka dib ayuu Warsame ka soo baxay jeelkii.

Kuna soo laabtay ururkii dhallinyarada, halkaas oo si sharaf ah loogu soo dhoweeyey, loona aqoonsaday geesigii dhallinta.

Warsame waxaa loo doortay in uu madax ka noqdo «Kooxdii Hoorseed» dhallinyarada S.Y.L.

Waxa uuna kordhiyey geesigu dagaalladiisii iyo gumeysi necaybkiisii.

Geeridu waa lama huraan. Warsame iyo kooxdiisii ayaa dagaalla ku qaaday gumeystihii oo ay isku heleen goob kale, ayagoo leh, dalkeenna aan daafacno.

Halkaas oo uu cadawgu la helay Warsame rasaas lama filaan ah.

Geesigu halkaa ayuu ku qur baxay.
Isgoo ku taahaya aah....... aah......., «Soomaaliyey toosa, Soomaaliyey toosa».
Laakiin geesigu ma dhinto.

Waxa uu geesigu ku nool yahay ilaha Jannada iyo wadnaha ummadda. Waayo, waa geesi u geeriyooday difaaca dalkiisa, dadkiisa iyo diintiisa.



**Warsame oo ay rasaastii gumeysiga ku dhacday isaga oo halgamaya**

### WEYDIIN

1. Warsame waa kee? Halkeese ku dhashay?
2. Yaraantiisii Warsame muxuu qaban jirey?

3. Ma jeclaa Warsame barashada quraanka?
4. Warsame ma wiil dabeecad san baa? Mase maya?
5. Yuu salaami jirey subax walba Warsame?
6. Markii uu dhammeeyey quraanka muxuu noqday Warsame?
7. Maxay ahayd naanaystii Warsame loo yiqiinay?
8. Muxuu ahaa qalabka uu qaadan jirey Warsame?
9. Yaa ku guuleystay dagaalkii dhex maray Warsame iyo libaaxii?
10. Maxaa ka lumay qoyska Warsame?
11. Qoysku ma ka fogaa magaalada? Muxuuse ku arkay Warsame magaalada?
12. Warsame muxuu la yaabay?
13. Markii uu arkay askartii caddaanka, muxuu weydiiyey aabbihii?
14. Maxaa loogu jawaabay Warsame?
15. Yuu arkay mar labaad Warsame?
16. Waa maxay heesta uu maqlay?
17. Maxaa helay jirkiisa? Yaase arkay?
18. Goormuu ku biiray Warsame ururkii S.Y.L.?
19. Halkee buu ahaa dagaalkii ugu horreeyey ee dhex maray Warsame iyo cadowga? Muxuuse watay Warsame?
20. Maxaa ka muuqday wajiga Warsame?
21. Yaa dilay horjoogihii cadawga? Maxaase lagu dilay?
22. Warsame yaa shirqoolka u dhigay?
23. Waa maxay sharafta la siiyey Warsame?
24. Yaa dilay geesiga?
25. Waa maxay ereyada uu ku qur baxay?
26. Geesigu ma run baa in uu dhinto?

Casharka Tobnaad

# CADAWGA SOOMAALIYA

Waa hore, ayey reer Yurub ku soo duuleen Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika.

Yurub waxay lahayd hub khatar ah.
Hubkaas ayey ku qabsatay dalal badan.

Dadkiina waa laayeen. Xoolihiina waa dhaceen.
Dhulkoodii waa qaateen.

Dadka intii hartay waa kala qaybiyeen.
Kaddibna waa addoonsadeen, waana ku shaqaysteen.
Dalalka sidaas loo qaybiyey waxay ahaayeen Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika.

Dalkeenna Soomaaliya wuxuu ka mid ahaa dalalkaa la qaybsaday, ee lagu shaqaystay.

Waxaa qaybsaday dalkeenna dawladaha wax gumeysta.
Dawladahaasi waxay ahaayeen :

Ingiriiska, Faransiiska, Talyaaniga iyo Amxaarada.
Waxay dalkeenna ku qaybsadeen magaalada Baarliin.

Baarliin waa magaalo Yurub ah.
Markaan maqlo Baarliin waa naxaa.
Baarliin dalkayga ayaa lagu qaybiyey.
Waxay noo qaybiyeen shan qaybood.

Waana kala xareeyeen.
Haddaba waa necebahay :
Ingiriiska, Faransiiska. Talyaaniga iyo Amxaarada.
Waa cadawga dalkeenna.

## Cadawga Ingiriiska

Ingiriisku waa cadawga dalkeenna.
Waa kan koowaad ee dalkeenna.
Ingiriisku waa isticmaar dalkeenna gumeysan jirey.

Welina wuu doonayaa inuu gumeysto.
Asagaa ugu weynaa intii dalkeenna qaybsatay.
Laba qaybood asagaa qaatay.

Qaybna wuxuu siiyey Amxaarada.
Qaybna waxaa qaatay Talyaaniga.
Qaybna waxaa qaatay Faransiiska.
Qaybna wuxuu siiyey Keenya.

Ingiriisku waa cadawgeenna.
Ingiriisku waa diradiraale.
Dadkayaguu isku diray.
Dadkayaguu isku laayey.
Markuu dalkeenna haystay waa isku keen diri jirey.
Ingiriisku waa cadaw.

Markuu inna haystay waa na layn jirey.
Xoolaheenna wuu dhici jirey.
Wax kastana waa noo diiday.
Waxbarasho waa noo diiday.
Isbitaal waa noo diiday.
Horumar waa noo diiday.

Xorriyad waa noo diiday.
Ingiriisku waa cadaw.
Waa cadawgayaga koowaad .

## Cadawga Talyaaniga

Talyaanigu waa cadaw.
Waa cadawga dalkeenna.
Wuxuu ahaa isticmaar.
Dalkeennuu gumeysan jirey.
Wuxuu xukumi jirey dhinaca koofureed ee Soomaaliya.

Markuu na xukumi jirey, wax kasta waa naga qaaday.
Wuxuu naga qaaday xorriyaddii.
Wuxuu naga qaaday xoolihii.
Wuxuu naga qaaday xooggii.
Dadkeenna waa ku shaqaysan jirey.
Khasab buu ugu shaqaysan jirey.

Talyaanigu waa cadawgayaga.
Wax kasta waa noo diiday.
Xorriyad waa noo diiday.
Xoolo inaan tacbanno waa noo diiday.
Waxbarasho waa noo diiday.
Caafimaad waa noo diiday.

Nabadgeliyo waa noo diiday.
Talyaanigu wuxuu ahaa cadaw.
Wuxuu nagu diley gaajo.

Barwaaqadii dhulkeenna asagaa la tegey.
Waddankiisu ku dhistay.
Beeraheennii buu qaatay.

Wixii ka soo baxa asagaa boobi jirey.
Dahabka dhulkeenna asagaa guran jirey.
Waxaas oo dhan wuxuu la aaday dalkiisa.
Dalkiisuuna ku dhistay.

Annagana wuxuu nooga tegey gaajo, cudur, jahli, khashiinimo iyo wixiisii xumaa oo dhan.

Talyaanigu waa cadawga Soomaaliya.

## Cadawga Faransiiska

Faransiisku waa gumeyste.
Wuxuu gumeystaa Xeebta Soomaaliyeed.
Caasimadda Xeebta Soomaaliyeed waa Jabuuti.

Xeebta Soomaaliyeed waa dhulkeenna.
Waxaa xoog ku haysta Faransiiska.

Faransiisku waa cadaw.
Dadkeenna waa xirxiraa.
Dadkeenna waa eryaa.

Dadkeenna waa dhacaa.
Dadkeenna waa isku diraa.
Oo waa kala qaybiyaa.

Inta xuriyadda doonaysa waa laayaa. Qaarna waa xiraa.

Dadka Xeebta Soomaaliyeed waxay rabaan inay soo raacaan dalkooda hooyo.

Dalkooda hooyo waa Soomaaliya.
Faransiisku wuxuu diidaa in Soomaaliya is raacdo.
Sidii Ingiriiskii iyo Talyaanigii.

Faransiisku waa dhacaa xoolaha dadkeenna.
Wuxuu la aadaa dalkiisa Faransa.
Faransiisku waa cadaw.

Waan la dagaallameynaa.
Xeebta Soomaaliyeed waa dalkayaga.

## Cadawga Amxaarada

Amxaaradu waa cadawga Soomaaliyeed.
Waa Afrikaan na gumeysta. Waa isticmaar.

Xabashidu waa kuwa haysta dalkeenna hooyo ee ku yaal Galbeedka Soomaaliyeed.

Waxaa ku nool dad badan oo Soomaali ah.
Intaasna waxay u dagaallamaan gobaninmadooda iyo xornimadooda.

Amxaaradu waa cadawgayaga.
Waa kuwa dila dadkayaga.
Waa kuwa gumeysta ummaddayada.
Waxay u diidaan waxbarashada.

Waxay ku dilaan gaajo.
Waxay laayaan xaasaska.
Waxay dhacaan xoolaha.

Waxayna boobaan beeraha tacabka.
Amxaarada waa neceb nahay.
Waana cadawga aynu leenahay.

Waana daba dhilifka gumeystaha.
Waa cadawga Soomaaliya.

## Cadawga Keenya

Keenya Ingiriiska ayey uga heshay dhaxal Soomaalida N. F. D.

Keenya waa cadaw kale oo aynu leenahay.
Waa kuwa afrikaan ah oo haysta dalkayaga.
Waxay gumeystaan Soomaali N.F.D.
N.F.D. waxay ku taal woqooyiga dalka Keenya.

Waxaa ku nool boqolaal kun oo Soomaali ah.
Waxaa dhaxalsiiyey Ingiriiska.
Soomaali N.F.D. waa walaalaheenna.
Waxay doonayaan xornimo iyo gobannimo.

Waxay rabaan in ay raacaan walaalahooda Soomaaliyeed.

Keenya waa neceb nahay.

Waa kuwa dila dadkeenna.

Waa kuwa booba xoolaheenna.

Dadkeenna waa dhacaan, waxna ma baraan.

Ma daaweeyaan, ma daneeyaan dadkeenna.

Keenya waa gumeysi madow oo haysta dalkeenna iyo dadkeenna.

Waa daba dhilifka isticmaarka.

Waa cadawga Soomaaliya.

Casharka Koow iyo Tobnaad

## XILKA IYO XIRIIRKA QOYSKA

Nolosha bani-aadmiga waxaa saldhig u ah dhismaha bulshada, asaaska bulshaduna waa qoyska.

Bani-aadamku keli keli uma noolaan karo.
Ruuxba ruux kale ayuu ku xiran yahay.
Xiriirka qoyskuna waa lagama maarmaan.

Waxaana waajib ah in la helo isku duubnaan bulsho iyo kalsooni nololeed.

Xilka guriga waa waajib ka dhexeeya qoyska oo dhan.
Haddaba waa maxay waajibaadka ka dhexeeya qoyska.

Aabbe waa tiirka kowaad ee qoyska.
Waa hoggaamiyaha qoyska.

Aabbe waa kan na jecel, annaguna aan jecel nahay.
Aabbe wuxuu toosaa aroorta hore.
Wuxuu tukadaa salaadda subax.

Wuxuu isudiyaariyaa shaqada.
Had walba wuxuu gacan ku siiyaa hooyo shaqada guriga.
Aabbe waa nin ka mid ah shaqaalaha dawladda.

Waa nin jecel shaqadiisa, maqlana madaxdiisa iyo waddankiisa.

Aabbe waa kan na siiya lacagta aynu cunno.
Waa kan na daaweeya marka aynu jirranno.

Waa kan noo sheekeeya oo na cayaarsiiya had walba.
Aabbe waa nin kacaan ah.

Had iyo jeerna ka qayb gala iskaa wax u qabso.
Waa hantiwadaag jecel dalkiisa iyo dadkiisaba.

Hooyo waa tiirka labaad ee qoyska.
Waa mas'uulka ugu weyn dhaqaaleynta guriga.

Hooyo waxay ka toostaa hurdada aroor hore.
Waxay diyaarisaa quraacda.

Waxay kululeysaa biyaha qabeyska.

Hooyo waa midda noo qabeysa, noo labista, noo shanleysa.

Waa midda u diidda jirkeenna wasakhda, ka ilaalisa cudurrada.

Hooyo waa midda dhaqda dharkayaga ee kaawiyadaysa.
Waa tan ka fakarta qurxinta aqalka iyo nadaafadiisa.
Waa tan aadda suuqa ee soo iibisa raashinka.
Waa tan na cayaarsiisa oo na maaweelisa had walba.
Waa tan na barta hadalka, naguna abaabisa asluubta toosan.

Hooyo waa mid kacaan ah oo ka qayb gasha iskaa wax u qabso.

Waa midda u horseedda danaha dalkeeda iyo dadkeedaba.

## I. Rooble

Rooble waa walaalkey.
Waa wiilka noogu weyn.
Waa arday dhigta dugsiga sare.
Subax walba wuxuu toosaa aroorta hore.
Wuxuu tukadaa salaadda subaxa.
Wuxuu u diyaar garoobaa aaditaanka dugsiga.

Rooble waa wiil dadaal badan, kamana habsaamo casharrada.

Wuxuu ka mid yahay ururka ardayda.
Waa horjoogaha fasalka.
Wuxuu labistaa dharka guulwadaha.
Rooble waa cod kar, waa hanuuniyaha ardayda.
Waa wiil ixtiraama barayaashiisa.

Rooble waa wiil xilkas ah, kana qayb gala iskaa wax u qabso.

Rooble waa walaalkeenna aynu jecel nahay.
Waayo! waa kan na bara duruusta, oo na geeya dugsiga.
Waa kan na dhaafsiiya jidka, nagana ilaaliya khatarta.
Rooble waa cayaaryahan.

Kubbadda cagta aad buu u yaqaan, ta shabaqana ka daran.

Had walba wuxuu na geeyaa garoonka kubbadda.
Wuxuu noo kexeeyaa shineemooyinka.
Rooble waa aabbahayaga labaad ee qoyskannaga.
Aad iyo aad bannu u jecel nahay.

## II. Raaxo

Raaxo dhaqso ayey u toostaa subax walba.
Raaxo waa walaashey, waa inan aad u wanaagsan.
Waxay isu diyaarisaa la shaqeynta hooyo.
Cuntada ayey la karisaa, alaabtay la dhaqdaa, dharkay la mayrtaa, mar walba waxay gacan siisaa hooyo.

Suuqa ayey u aaddaa hooyo, oo u soo iibisaa raashinka qoyska.

Raaxo waa inanta ugu yar qoyska, waa toddoba jir.

Waxay dhigataa dugsiga hoose, gaar ahaan fasalka labaad.

Raaxo waa inan aad u jecel waxbarashada.
Kama habsaanto casharka, mana u goyso dugsiga.
Subax walba dhaqso ayey u tagtaa dugsiga.
Waxay salaantaa barayaasheeda iyo jaallayaasheeda.

Waxay ku tiraahdaa «Subax wanaagsan jaallayaal».
Raaxo waa horjoogtada fasalka.
Waayo! waa xilkas waana heestaa, cod qurxoon bay leedahay.

Had walba waxay masishaa riwaayadaha dugsiga.
Raaxo waa inan firfircoon oo had iyo jeer ka qayb gasha Iskaa wax u qabso.

Dugsiga ayey wax ka nadiifisaa.

## 1. Weydiin

1. Maxaa saldhig u ah nolosha bani-aadmiga?
2. Dadku ma u noolaan karaa keli keli?
3. Waa maxay waajibaadka ka dhexeeya qoyska?
4. Waa ayo aabbe?

5. Goormuu hurdada ka toosaa aabbe? Muxuuse ka qabtaa guriga?
6. Yuu u shaqeeyaa? Ma maqlaa madaxdiisa?
7. Aabbe yuu siyaa lacagta?
8. Ma ka qayb galaa Iskaa wax u qabso?

**2. Weydiin**

1. Hooyadu waa tee? Ayaa guriga ka mas'uul ah?
2. Goormay toostaa hooyo?
3. Yaa diyaariya quraacda?
4. Ma neceb tahay hooyo wasakhda?
5. Yaa aada suuqa? Yaase na bara hadalka?
6. Ma ka qayb gashaa hooyo Iskaa wax u qabso?
7. Ma tahay Kacaanad hooyo?

**3. Weydiin**

1. Rooble waa kuma? Goormuu toosaa? Mase jecel yahay dugsiga?
2. Muxuu ka yahay fasalka? Muxuuse labistaa?
3. Muxuu kuu yahay Rooble? Yaa ku geeya dugsiga?
4. Ma cayaaraa Rooble kubbadda? Sideese ku yahay?
5. Ma jeceshahay walaalkaa? Maxaad ku jeceshahay?

**4. Weydiin**

1. Goormay toostaa Raaxo? Maxayse qabataa?
2. Raaxo gacan ma siisaa hooyo?
3. Halkey wax ka baratаa? Mase jeceshahay dugsiga?
4. Yey salaantaa Raaxo? Dugsiga maxay u qabataa?
5. Iskaa Wax U Qabso ma ka qayb gashaa? Mase maya?

Casharka Laba iyo Tobnaad

## GABADHA SOOMAALIYEED

**Gabadha Soomaaliyeed waxaa lagu yaqaan shaqo? Geesinimo iyo Adkaysi**

Gabadha Soomaaliyeed waxaa lagu yaqaan **shaqo** badan, **geesinimo** iyo **adkaysi.**

Xagga shaqada, waxaa lagu tilmaamaa ma daasho.

Xoolaha ayadaa raacda, oo baadi doonta, oo lusha, oo aroorisa, gaar ahaan ariga.

Beeraha ayadaa fasha, abuurta, ilaalisa, oo goysa inta badan.

Shaqada kale ee dhismaha dalka ayadaa ugu horreysa.

Waxay uga shaqaysaa Iskaa Wax U Qabso : Dhismaha warshadaha, dugsiyada, isbitaallada, jidadka, beeraha, xafiisyada, golayaasha shirka iyo wixii la mid ah.

Waxay ugu horreysaa ololayaasha, sida kan waxbarashada Ayadaa ka shaqaysa, inta badan.

Ayadaa wax ka barata, ayadaa bare ka ah.
Intaas oo dhan waxaa u dheer shaqada guriga oo ay kaligeed samayso oo dhisto, inta badan, gaar ahaan reer miyiga.

Gabdhaha Soomaaliyeed waxay qaataan (shahaadooyin sharaf ah). Waxaa loo aqoonsaday inay yihiin (shaqa yahan).

**I I**

Waxaa kale oo lagu yaqaan gabadha Soomaaliyeed geesinimo.

Dhib kama baqdo. Oon kama baqdo.
Gaajo kama baqdo. Dagaal kama baqdo.

Gaalada ama gumeysiga kama baqdo.
Dagaalka gumeysiga ayadaa ugu hor marta.

Maalinta dagaalka waxay qaadataa qalabka lagu dagaallamo.

Wax bay dishaa ama waa la dilaa.

Laakiin ma baqdo. Ayadoo sii jeedda weligeed lama dilin.

Gabdhaha Soomaaliyeed waa adkaysi badan yihiin.

Marka ay shaqaynayaan ama ay dagaal ku jiraan wax kale ma xusuustaan.

Aad bay u adkaysi badan yihiin.

Socodka, oonka, gaajada, daalka, kulaylka, dhaxanta iyo wixii la mid ah, waa u dulqaataan.

Waxay jecel yihiin dadkooda iyo dalkooda.

## III

Geesinimada gabadha Soomaaliyeed waxaa tilmaan u ah gabdhihii la oran jirey (Siistooyin) «Sisters» ama (Walaalaha). Magaca Siistoonyin ama Walaalaha wuxuu la mid ahaa magaca Jaalle. Siistooyinku waxay ahaayeen gabdhihii horseedka ahaa ee Xisbigii Dhallinyarada.

Xisbiga Dhallinyaradu wuxuu ahaa kii u soo dagaallamay xorriyadda Soomaaliya. Gabdhaha Siistooyinka ahaa waxay ahaayeen gabdho «dagaal yahaniin» ah. Waxay isku dhaarsadeen inay Soomaaliya xoreeyaan, oo ay ka xoreeyaan cadawga dalkeennu haystay. Kaas oo ahaa Ingiriiska. Talyaaniga, Faransiiska iyo Amxaarada. Waxay ahaayeen guulwadayaal Waxay siiyeen Dalka Soomaaliya noftoodii iyo xoolahoodii.

Waxay doonayeen inay arkaan Soomaaliya xor ah, oo barwaaqo ah.

## IV. XAAWO CISMAAN (Xaawo Taako)

Gabdhahaas Siistooyinka ahaa ama gabdhaha (Walaalaha Soomaaliyeed),, waxaa ka mid ahayd gabar Siisto ahayd.



Taallada Xaawo Taako

Waxaa lagu magacaabi jirey (Xaawo Cismaan), «Taako». Xaawo Taako waxay ahayd gabar dagaal yahan ah.

Waxay ahayd geesiyad xorriyadda jecel, oo neceb gumeysiga iyo kuwa u adeega.

Xaawo Taaka waxay ku dhalatay oo ku soo kortay Gobolka Jigjiga. Jigjiga waxay ku taal Dalkeenna Soomaaliya ee ay Amxaaradu haysato. Xaawa Taako waxay waraaq ka heshay gabar saaxiibteed ah.

Gabadhaa waxaa la oran jirey Maryan. Maryan waxay ahayd siisto joogtey maalintii Amxaaradu gubtay Jigjiga, dadkeediina laysay. Xaawo Taako waxay ka mid ahayd waagii hore Xisbigii Dhallinyarada Soomaaliyeed, laanta Jigjiga. Maalintaas dadkii Xisbiga qaar waa la laayey, qaarna waa baxsadeen.

Xisbigiina waa la xiray. Xoolihii dadkana waa la dhacay. Xaawo Taako aad bay uga naxday sida cadawga Amxaaradu u cadaabey dadkeeda Soomaaliyeed.

Amxaaradu naxariis ma leh.

Dadka masaakiinta ah waa dhacaan. Ayagana waa laayaan.

Markii ay Amxaaradu xirtay Xisbigii Dhallinyarada, Xaawo Taako aad bay uga naxday.

Magaalada Xamar Xisbiga Dhallinyaradu xoog buu ku lahaa.

Xaawo waxay mar kasta ku qaylin jirtey :
Aan gumeysiga dalkeenna ka saarno.
Aan dadkeenna u hiillinno.
Gumeysigu waa bahal.
Bahal xergadaada looma daayo.
Isticmaarku dadkeennuu laayaa.
Isticmaarku naxariis ma leh.
Haw naxariisannina isticmaarka.
Xoolaheenana waa dhacaa.
Inagu saw dad ma ahin? Maan la dagaallanno?

Maan laynno? ! Maan dalkeenna ka cayrinno?!
Waa ka adag nahay.
Gumeysigu xaqdarro ayuu dalkeenna ku joogaa.

Gumeysigu xaqdarro ayuu inna kula dagaallamayaa.
Innagu xaq ayaan ku dagaallamaynaa.
Dhulkeenna korkiisa ayaan ku dagaallamaynaa.

Dhulkaa inoo hiillinaaya. Xaqaa inoo hiillinaaya.
Marka waa ka adkaanaynaa.
Xaawo Taako sidaas ayay oran jirtay.

## VI

Waqti yar ka dib markii ay Amxaaradu gubtay Jigjiga, ayaa gumeysigii Ingiriisku la dagaalay Soomaalida. Ingiriisku markaas wuxuu haystay Soomaaliya oo dhan Woqooyi iyo Koonfur.

Ingiriiska waxaa la socdey dad uu soo ijaartey.

Ingiriiskii iyo dadkii uu soo ijaartey, iyo Soomaalidii ayaa diriray. Dagaalku wuxuu dhacay markii uu Ingiriisku soo weeraray Gurigii Xisbiga. Xasbiga waxaa ilaalinayey oo joogey markaas gabdhihii Siistooyinka ahaa. «Gabdhaha Waalaalaha» waxaa ka mid ahayd Xaawo Cismaan «Xaawo Taako». Xaawo Taako iyo gabdhihii kale waxay arkeen cadawga ku soo socda. Xaawo Taako marka ay aragto cadawga waa isqanqaniini jirtey. Waana ku soo ordi jirtey. Kama biqi jirin cadawga Xaawo. Cadawgii wuxuu ku soo dhawaadey naadigii Xisbiga. Markaas ayey «Xaawo» iyo gabdhihii kale ka hortageen. Isla markiiba dagaal baa dhexmaray gabdhihii iyo cadawgii Ingiriiska.

Waxaa laga adkaaday Isticmaarkii Ingiriiska.

Soomaalidii baa adkaatay. Xaawo Taakana meeshaas ayaa lagu diley oo ay ku dhimatay. Xaawo fallaar baa kaga dhacday naaska korkiisa. Meesha «Xaawo» lagu diley waxay ahayd meesha hadda laga dhisay Taalladeeda ee magaalada Xamar.

Waxaana la diley 11kii Jannaayo 1948dii.

Xaawo Taako waxay ahayd gabar Soomaali ah oo geesiyad ah.

Waxay u dhimatay Calanka Soomaaliyeed.

Waxay u dhimatay xorriyadda Ummadda Soomaaliyeed. Weligeen illaawi mayno sheekada Xaawo Taako.

Taallada «Xaawo Taako» waxay calaamad u tahay geesinimada, shaqo badnaanta, adkaysiga, waddaninimada gabdhaha Soomaaliyeed iyo dadka Soomaaliyeed oo dhan.

Ma jeceshahay inaad noqotid «Xaawo Taako» oo kale?

Waad noqon kartaa Xaawo Taako oo kale iyo mid ka sii fiicanba.

**Layli :**

1. Gabdhaha Soomaaliyeed ma la dagaallameen gumeysigii?
2. Xisbigee ka mid ahayd Xaawo Taako?
3. Xagge lagu dilay Xaawo Taako?
4. Goob Sharaf ma ku dhimatay Xaawo Taako?
5. Ma jeceshahay inaad noqotid geesiyad sida Xaawo Taako oo kale?

Casharka Seddex iyo Tibnaad

## ILAALIYAHA DALKA



Ummad kasta waxay leedahay dhul.

Ma jiro dad aan dhul lahayn.

Sidoo kale, ma jiro dhul aan dad lahayn.

Innagu waxaynu leenahay dhul.

Waa dhulka Soomaaliya.

Soomaaliya waa barwaaqo.

Dhulkeennu waa barwaaqo.

Wuxuu leeyahay cadow badan.

Waxaan leenahay ciidan badan oo xoog leh.

Waxay ilaaliyaan dhulkeenna Soomaaliya.

Waxay ka ilaaliyaan cadawga dibadda iyo kan gudaha.

Ciidammadeennu waa badan yihiin.

Waxaa ka mid ah :

1. Xoogga Dalka
2. Ciidammada Booliska
3. Ciidammada Nabad Sugidda
4. Guulwadayaasha
5. Ciidammada Dawladda Hoose
6. Ciidammada Xabsiyada.

Ciidammadaas oo dhan dalka Soomaaliya ayey ilaaliyaan. Shaqooyin kale oo kala duwanna way qabtaan.

**1. Xoogga Dalka :**



Xoogga Dalku waa kan ugu xoog weyn.
Wuxuu ilaaliyaa dhulkeenna.

Wuxuu ilaaliyaa birrigiisa, baddiisa iyo hawadiisa.
Wuxuu ka daafacaa cadawga, dibadda iyo kan gudaha.

Xoogga Dalku waxaa kale oo uu ka shaqeeyaa horumarka daika. Wuxuu falaa beeraha.

Wuxuu wax ka dhisaa dugsiyada, isbitaallada, jidadka, buundooyinka, warshadaha iwm.

Xoogga dalku waa **ilaaliye**, waa **daaface**, waana **dhise.**

## 2. Ciidammada Booliska :



**Ilaliyayaasha Dalka**

Ciidammada Boolisku waa xoogga labaad ee dalka. Waxay ilaaliyaan nabadgelyadeenna iyo raaxadeenna.

Waxay naga ilaaliyaan tuugada, isdilka, isdhaca.

Waxay qabtaan wixii xun oo dadka dhiba, ka dibna waa edbiyaan.

Cidammada Boolisku waa sida Xoogga Dalka oo kale.

Waxay ilaaliyaan dhulkeenna iyo dhaqaalihiisa. Waxay qaadaan canshuuraha.

Haddana, waxay ka shaqeeyaan dhaqaalaha dalka.

Ayaguna waa **ilaaliyaal,** waa **dhisayaal** oo waa kuwo lagu

## 3. Ciidammada Nabad Sugidda :

Waxay ka shaqeeyaan nabad gelyada ummadda.

Waxay ilaaliyaan dalka.

Waxay ka ilaaliyaan dibusocodka, afmiinshaarka, beenaalaha iyo wixii fidno wada.

Ciidammada Nabad Sugiddu ayaguna waa **ilaaliyeyaal, Daafacayaal** iyo **nabadsugayaal.**

## 4. Guulwadayaasha :



**Ilaaliyayaasha Dalka**

Guulwadayaashu waa ciidammo naftooda hurayaal ah.

Waxay u dhaarteen inay ilaaliyaan Kacaanka.

Waxay qabtaan shaqooyin badan.

Waxaa ka mid ah :

Waxay la dagaallamaan cadowga Tawradda.
Waxay ilaaliyaan miraha Kacaanka.

Waxay dhawraan nabadgelyada.

Waxay ka shaqeeyaan dhismaha dalka.
Guulwaduhu waa **naftihure,**

Guulwaduhu waa **ilaaliye,**
Guulwade waa **dhise.**

5. **Ciidammada Asluubta (Xabsiyada)**

Ciidammada Asluubtu waxay ilaaliyaan xabsiyada.

Waxay edbiyaan dadka gefka sameeya.

Waxay wax baraan dadka beesha ku xadgudba.

Ciidammada Xabsiyada waa **ilaaliyaal.**

Waa **edbiyeyaal.**

Waa **barayaal.**

6. **Ciidammada Dawladda Hoose :**

Waxay ilaaliyaan lacagta dawladda.
Waxay qaadaan canshuuraadka.
Canshuurta dalkaa lagu dhisaa.

Canshuurta waxaa lagaga shaqeeyaa isbitaallada, dugsiyada iwm.

Ciidammada Dawladaha Hoose waa ilaaliyayaal.
Waa kee ilaaliye?

Waa Xoogga Dalka
Waa Ciidammada Booliska
Waa Cidammada Nabad Sugidda

Waa Ciidammada Asluubta
Waa Guulwadayaalka
Waa Ciidmmada Dawladaha Hoose

Dhammaantood waa ilaaliyeyaal
Annagay noo shaqeeyaan
Waan jecellahay.

Casharka Afar iyo Tobnaad

# CAYAAR SOOMAALI

Sida la wada ogsoon yahay ummad waliba waxay leedahay dhaqan, caado iyo cayaaro u gaar ah.

Cayaarahu waa tusmo ummadeed, waana tiirarka ugu waaweyn oo ay ummaddu leedahay.

Haddaba dalka Soomaaliya wuxuu hodan ku yahay cayaaro, hiddo iyo dhaqan.

Taasu waxay tilmaan u tahay in ummadda Soomaaliyeed ay leedahay taariikh iyo ilbaxnimo aad u qoto dheer.

Dalkayagu wuxuu ku caan baxay cayaaro fara badan oo kala jaad jaad ah. Waxaana ka mid ah :

Beerrey, Seylici, Batar, Wiira Wiiro, Wilisaqo, Dhaanto, Gabley Shimbir iwm.

**Beerreey**

Cayaarta la yiraahdo Beerrey waxay ka mid tahay kuwa ugu xiisaha badan.

Waana midda loogu jecel yahay cayaaraha laga dheelo dhulkayaga.

Cayaarta Beerreydu waa tu xarfaan gooniya leh.

Waa mid jirkaaga ku abuurta dhaqdhaqaaq.

Waa mid dhaqdhaqaajisa ruxaya xubnahaaga.

Beerreyduna waa mid asalkeedaba laga qaatay «Goroyada».

Waxaana jirtay in laba nin oo reer miyi ah ay arkeen Goroyo si qurux badan u cayaareysa oo labada garab isku garaaceysa sida sacabka oo kale, oo isqalabaa rogeysa, qun yar u leex leexineysa luqunta, darandoori u rideysa lugaha.

Markaa ayey labadii nin aad u jeclaysteen oo ay bilaabeen in ay cayaaraan, xirfadna ay ku qaataan.

Dabadeed waxay ku dhaqaaqeen in ay urursadaan dhallinyaro fudfudud aadna u firfircoon.

Labadii nin waxay dhallintii tusaaleeyeen cayaartii iyo hanaankeedii oo ay wada cayaareen.

Halkaas ayayna ka bilaabatay cayaarta la yiraahdo **Beerrey** oo ay ku fidday dhammaan dalka Soomaaliyeed.

**Laylin :**

1. Cayaaruhu sidee bay u yihiin tusmo ummaddeed?
2. Soomaaliya ma leedahay fan u gaar ah?
3. Sheeg saddex cayaarood oo caan ku ah dalkayaga?
4. Ka sheekee sida ay ku timid cayaarta beerreydu?
5. Ma jeceshahay cayaar Soomaali?
6. Teese ugu jeceshahay?

**Tilmaame bare**

Cashar kasta oo ka mid ah casharrada Buugga ku qoran dhammaadkiisa, waxaa loogu tala galay in ilmuhu qaadaan hees la macne ah, ama u macne dhaw. Heesahaas loogu tala galay cashar kasta dhammaadkiisa waxaa laga heli karaa degaanka, ama magaalada ay ilmuhu wax ku bartaan, laakiin in kasta oo ay sidaas tahay, waxaan hoos idiin ku soo qornay dhowr heesood oo fudfudud oo ay ilmuhu qaadan karaan. Haddaba, waxaa waajib ah inaad u doorataan cashar kasta hees munaasib u ah, wixii maqanna aad doonataan.

## Waagii baa dillaacay

Waagiibaa dillaacoo
nin waliba dantiisiyo
dawankii waa yeeray
dawankii wuxuu yiri
ardayahay digtoonow
dadkii weys diyaarshoo
shaqaa loo dareeray
dawankii muxuu yiri
dhan! dhan! dhan!
digtoonow, dugsigiinna aada.

**(Axmed Nuur Yuusuf)**

## Waa Subax Wanaagsan

Waa subax wanaagsan
saaxiibbayaalow
waa sannad wanaagsan
saaxiibbayaalow
waa sayr ma weydoo
saaxiibbayaalow
oo sama la dhalatay
calanka aan salaanno
oo samo iyo khayr leh
calanka aan salaanno
ina wada simeysee
calanka aan salaanno

**( Axmed Nuur Yuusuf)**

## Xorriyaddu

— Xorriyaddu, dhiig-xinjira qubtay rabtaa, xorriyaddu
— dad la xaaqa oo xabbis lagu guriyo xawgo'bay rabtaa

Xorriyaddu Xorriyaddu

— isxilqaamid iyo xarbi loo galiyo xoog bay rabtaa

Xorriyaddu Xorriyaddu

— nin qayrkiis loo xiirayaw adigaa ku xigee dhimashada xalaasha ah geesiyada xushmada liyo sida Xaawo Taako dib ha laguu xasuusto.

Xorriyaddu Xorriyaddu

**(Axmed Nuur Yuusuf)**

## Calan Suubanoo

Calan suubbanoo
maalintii la suray
same ku gaarnayoo
waa inaan u sara kacnaa
markii la saarayaba
sidaynu u dhannahay
cirkoo saafiyaan
saqda dhexe habeen
sidiisii u iftoo
waa inaan u sarakacnaa
markii li saarayaba
saymaha curtiyo
samayada xiddiga
summad wuxuu u yahay
waa inaan u sara
sida bad u ekow
sina uma ogsani
sakaarkii dhulkiyo
samada u ekoo
sidaanu doonayniyo
sucdi leh baa tahay
salaan la hortagnaa
u sacab tunnaa sacab tunnaa
soomaaliyey u wada jirnaa
sagal daruur lahayn
dayax soo baxaad
saxarlaa tahee
salaan la hortagnaa
u sacab tunnaa - u sacab tunaa
sayruukh la mood
dhexda kaga sawiran
shanta Soomalee
kacnaa salaan la hortagnaa
samo iyo wanaag
waxaan kula simee
sarreeyaa tahee.

**(Axmed Nuur Yuusuf)**

## Wallaahi Dhulkayagow

Wallaahi dhulkayagow
abkaygaa kugu dhaqmay
aniga yaa kugu dhashay
dhiiggayaga waan ku siiyey
aabbahay baa kugu dhistay
ilmahaygaa kugu dhalan

**(Dhiima Cabdi Seed)**

## Barayaasha

Barayaasha iyo
waxaan u barbaaraynaa
ballankeennu ballankeennu
aabbihii na dhaloow
cilmi u baranaynaa
waa barwaaqada badiyo ber-
rida.

inaan la soo baxnaa ............

**(Maryan Xaashi)**

## Siraadka Afrika

Siraadka Afrika laabtiisu saxar madow lahayn Siyaad
aabbaha soomaalida cusub soo jeede foojigan

Siyaad

sadkiisa lama cunee sir ma qabe dadaal badan
libtiisa lama sidkee sareeda iyo guul barwaaqo
loo siman yahay sacaado noogama horreyn

Siyaad

sidaan u qaadannay tawraddaan ku dhaadanay
sifaalahaan u soo marnay sama doqontii seexataa

seceedu dibi dhalaa
negaade suubanow salguri baan dhisnee
sareedo noogama horreyn loo siman yahay

Siyaad

sacaado noogama horreyn

Siyaad

sidaan u qaadannay hanti wadaagga nolosha noo simay
silic iyo saboolba waan sagootinnay
tallaabadii Siyaad sokeeye iyo nacab
siyaasad hufan buu dunida kula socdaa
sareeda iyo guul barwaaqo loo siman yahay
sacaado noogama horreyn

Siyaad

**(Xasan Sh. Muumin)**

## Siyaad Siyaad

Siriqduu gumeysigu
silic iyo dhibaatadii
Siyaad - Siyaad
waan ku garab soconna
sidaad nagu amartaba
sarreeyahaya guudow siyaad
salaan iyo ducaan
tawraddii Oktoobar
sulubkii ugu horreeyoo
soomaali geliyey
geesigii ka saarow

salabka waan sidannaa
waannu suubinaynaa
subax waa baryaba
kuu soo dirnaa
nimankii sameeyoo
soo abaabulayow

Siyaad Siyaad Siyaad

sareedada dhulkeenna
ku soo saari doonnaa
soortaan wadaagno iyo
in qabiilku suuloo
iskaa wax u qabsaan
jaallihii noo horseedow
hawshoo loo sinnaado
samawadihii na barayow

Siyaad Siyaad Siyaad

**(Axmed N. Yuusuf)**